


A background image showing three people in a kitchen setting. A man in the foreground is wearing a white chef's coat and a grey apron, looking down at a pot. Behind him, a woman and another man are also working. The image is overlaid with a semi-transparent blue rectangle containing the main text.

Shaqadaada ma ku weyday sabab aan adiga kaa imaan? **Waan ku caawin karnaa**

Barnaamijka Dislocated Worker Program wuxuu caawin karaa dadka shaqadooda ku waayay sabab aan iyaga ka imaan, si ay dib ugu helaan shaqo mushahar leh iyo gunnooyin la mid ah kuwii ay hore u heli jireen. Barnaamijkan waxaa si bilaash ah loogu heli karaa marka uu shaqaalaha buuxiya shuruudaha u-qalmitaanka.

CareerForce waa ilaha rasmiga ah ee Minnesota ee loogu talagalay sahaminta xirfadaha iyo raadinta shaqo. Nidaamka CareerForce wuxuu ka kooban yahay xirfadlayaal ku takhasusay horumarinta shaqaalaha oo ka socda ururo ku baahsan gobolka, kuwaas oo u adeega dadka shaqo doonka ah iyo loo-shaqeeyayaasha.

Adeegyada ay heli karaan dadka shaqada laga fariisiyay:

- › Kaalmo waxbarasho iyo tababar oo uu oggolaaday la-taliyaha
- › Kulamo qof-qof ah oo lala yeesho khabiir dhinaca xirfadaha ah
- › Kaalmo ah raadinta shaqada
- › Caawimaad lagu helayo adeegyo kale oo taageeraya guushaada xirfadeed

CareerForce.MN.gov

Hel goobta CareerForce ee kuugu dhow: [CareerForce.MN.gov/locations](https://www.careerforce.mn.gov/locations)
SAHMI occupations and set career goals that match your interests and skills
RAADI kumannaan shaqooyin bannaan oo ka jira Minnesota.

CareerForce waa goob shaqo iyo adeeg bixisa oo qof walba si siman ula dhaqanta.





Sidee ayay CareerForce ii caawin kartaa?

Qorsheynta shaqada iyo la-talinta xirfadda

- › Macluumaad ku saabsan shaqooyinka mushaharka fiican leh ee baahida loo qabo
- › Qiimeyn onlayn ah oo lagu ogaanayo danahaaga iyo xirfadahaaga, si lagu caawiyo helidda xirfadda kugu habboon
- › Caawimaad lagu dejinayo yoolalkaaga shaqo iyo tallaabooyinka xiga
- › Aqoon-is-weydaarsiyo kaa caawinaya qorsheynta xirfadda iyo raadinta shaqada

Caawimaadda raadinta shaqada

- › Caawimaad lagu hagaajinayo CV-gaaga, diyaarinta wareysiga shaqada, iyo dhisidda xiriirrada shaqo
- › Ku xirka adeegyada waxbarashada, oo ay ku jiraan barashada Ingiriisiga oo ah luqad labaad (ESL) iyo Waxbarashada Aasaasiga ah ee Dadka Waaweyn
- › JCarwooyinka shaqada iyo fursadaha lagu dhisto xiriirrada shaqo

Taageerada waxbarashada iyo tababarka ee loogu talagalay dadka buuxiya shuruudaha.

- › Tababar lagu kasbanayo shahaado jaamacadeed, shahaado xirfadeed, ama ruqsad
- › Caawimaad lagu horumarinayo xirfadaha kaa caawinaya inaad si wanaagsan uga shaqeysa goobta shaqada
- › Tababar lagu baranayo xirfado cusub oo ku saabsan shaqo ama xirfad cusub

Adeegyada taageerada

- › Caawimaad laga bixiyo kharashaadka sida gaadiidka ama daryeelka qoyska, si ay kaaga caawiso inaad gaarto yoolalkaaga shaqo ama tababar.

Sideen caawimaad ku heli karaa?

- › **Wac** 651-259-7537 | 866-213-1422 | TTY: 651-296-3900 | **Iimayl** deed.dw@state.mn.us
- › **La xiriir shaqaalaha** CareerForce ee goobta kuugu dhow. Booqo [CareerForce.MN.gov/locations](https://www.careerforce.mn.gov/locations) ama wac 651-259-7500

Macluumaadkan waxaa loo heli karaa qaabab kale oo ku habboon dadka naafada ah adigoo wacaya 651-259-7500 (cod) ama isticmaalaya adeegga gudbinta taleefanka ee aad doorbidayso.

CareerForce waa loo-shaqeeye iyo adeeg-bixiye dadka oo dhan siya fursado loo siman yahay. CareerForce waxay si sharaf leh uga mid tahay shabakadda American Job Center.

Barnaamijkan waxaa qayb ahaan taageera Waaxda Shaqada ee Maraykanka (U.S. Department of Labor), taas oo qayb ka ah maalgelin la siiyay Gobolka Minnesota. Macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan maalgelinta federaalka ee Dislocated Worker ka hel: [at mn.gov/deed/about/what-guides-us/governance/stevens.jsp](https://mn.gov/deed/about/what-guides-us/governance/stevens.jsp)